

Qorshaha lagaga hortegayo cunsuriyada

Macluumaadka loogu talagalay xannaaneeyayaasha iyo waalidiinta

Cunsuriyadu waxay saameysaa faydaqabka ardeyga, ka qaybgalka dugsiga iyo natiijooyinka waxbarasho. Cunsuriyada iyo dabeecada cusurinimo looma adkeysanayo dugsiyada dawlada ee NSW.

Muxuu ku saabsan yahay qorshahani?

[Anti-Racism Policy](#) (Qorshaha Lagaga hortegayo Cunsurinimada) wuxuu kor u qaadayaa xushmada iyo wanaag ku wada joodiga jawiga dugsiga. Waxay ujeedadeedu tahay in la hubiyo fursadaha waxbarasho ee cadaalad u ah dhammaan ardeyda iyadoon loo eegaynin dhaqankooda, luuqadooda ama asalka diintooda. Qorshuhu :

- wuxuu aqoonsadaa saameynta cunsuriyada lagu sameeyo dadka Aborjuniiska ah
- wuxuu hubiyaa in dugsiyadu ay ka qabaan rajo weyn dhammaan ardeyda iyo inaan kooxna ardeyda laga joojin inay gaaraan meesha ugu sareysa oo buuxda iyadoo loo eegayo dhaqankooda, diintooda ama asalka luuqadooda
- wuxuu ka raba dhammaan xubnaha bulshada dugsiga inay ka fekeraan dabeecadooda oo ay hubiyaan in ficiladoodu aysan u keenin in dadka kale la kulmaan cunsuriyad
- wuxuu ka doonayaa dhammaan shaqaalaha tababar dhammeystiran si ay u fahmaan masuuliyadooda ka hortega cunsuriyada
- Wuxuu ka doonaanayaa dugsi kastaa inuu leeyahay sarkaalka xiriirka ka hortaga cunsuriyada oo tababaran.

Waa maxay Sarkaalka Xiriirka Ka hortaga Cunsuriyadu?

Sarkaalka Xiriirka Ka Hortaga Cunsuriyadu (Anti-Racism Contact Officer (ARCO)) waa macalim uu magacaabay maamuluhu oo ka caawinaya dugsiga hogaaminta waxbarashada ka soo horjeeda cunsuriyada. ARCO wuxuu caawinayaa maamulhu inuu bixiyo:

- taageero uu ku dhisayo inuu shaqaaluhu fahmo saameynta ay ku yeelanayso cunsuriyadu waxbarashada ardeyga iyo faydaqabka.
- kala taliyo ardeyda iyo shaqaalaha sidii ay uga jawaabi lahaayeen markay arkaan ama maqlaan dhacdooyin cunsuriyadeed
- kala taliyaan istaraatiijiyada dugsigu uu dhaqangelin karo si uu uga hadlo cunsuriyada.

ARCO waa loo soo tababaray inuu siiyo tallo waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha, iyo macalimiinta iyo ardeyda wixii ku saabsan nidaamka lagu xalinayo [complaints](#) (cabashooyinka) ku saabsan cusuriyada. Haddii la codsado, ARCO wuxuu sidoo kale noqon karaa [support person or advocate](#) (qof taageero ah ama u doode) inta lagu jiro habka lagu xalinayo cabashooyinka.

Maxaan sameeyaa haddii ilmaha ugu kala kulmayo cunsuriyad dugsiya?

Haddii ilmaha ugu kala kulmayo cunsuriyad dugsiya, waa inaad ku dhiirigelisaa inay u soo sheegaan macalimka ama Sarkaalka Xiriirka Ka Hortaga Cunsuriyada dugsiya, ama adaaba soo sheegi kara adoo metelaya ilmahaaga.

Sidee baan usameeyaa cabashada ku saabsan cunsuriyada dugsiya?

Xubin kasta oo ka mid ah bulshada dugsiya, oo ay ku jiraan ardeyda, shaqaalaha, xannaaneeyayaasha iyo waalidiinta [make a complaint](#) (way sameyn karaan cabasho) ku saabsan cunsuriyada. Cabashooyinka cunsuriyada waxaa loo soo sheegi karaa maamulayaasha, Sarkaalka Xiriirka Ka Hortaga Cunsuriyada ama xubin kasta oo ka mid ah shaqaalaha. Cabashooyinka cunsuriyada waxaa maamulaha [School Community and Consumer Complaint Procedure](#) (Nidaamka Cabashada Macmiilka iyo Bulshada Dugsiya).

Ka waran cunsuriyada online ka ah?

Cunsuriyada la xiriirka dugsiya ee ka dhacda online, sida ardey si toos ah ugu sameynaya cunsuriyad ardey ama koox dhaqameed kale, waa in sida kore loogu soo sheegaa dugsiya. Wixii tallo ah ee ku saabsan sidii aad online ahaan ugu ahaan lahayd, eeg [Online safety](#) (Amaanka Online ka ah) ee eSafety Commissioner website (website ka Guddoomiyaha eSafety).

Xaggee baan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Wixii macluumaad dheeraad ah eeg [Anti-racism education](#) (Waxbarashada Ka soo Horjeeda cunsuriyada).

Caawimaada turjumaanka

Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya inaad dugsiya la hadasho ama inaad ballan ka sameysatid xubin shaqaalaha ka mid ah fadlan ka wac Adeegga Turjumaanka Taleefanka 131 450 oo ku weydiiso turjumaan luuqadaada.

U sheeg xiriiriyaha lambarka taleefanka dugsiya ka dibna xiriiriyaha ayaa wici doona dugsiya oo khadka soo gelin doona turjumaan kaa caawiya wadda hadalkaaga dugsiya.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan inta lagu jiro kulamada shaqaalaha dugsiya, weydii dugsiya inuu kuu sameeyo mid. Dugsiya wuxuu sameyn doonaa turjumaan yimaada, mid online ah ama turjumaanka taleefanka, iyadoo ku xiran helitaankooda. Adeega turjumaanka lacag lagaama qaadi doono.